Heshiis Daryeel oo loogu talagalay Ka-faa'iideystayaasha iyo Daryeelayaashooda

Care Agreement for Beneficiaries and Their Caregivers

Adiga oo ah ka-faa’iideystaha WA Cares ee doortay shaqaaleysiinta adeeg-bixiye shakhsiyeed iyadoo loo marayo Consumer Direct Care Network Washington, ayaa waxaad mas’uul ka noqon doontaa maareynta shaqadooda maalinlaha ah ee ay adiga kuu qabtaan. Waa muhiim in labada dhinac ay yeeshaan heshiis ku saabsan daryeelka la bixin doonno. WA Cares waxay dhiirrigelinaysaa in heshiiskan lala isticmaalo mid kasta oo ka mid ah daryeelayaashaada, oo ay ku jiraan daryeelayaal ka tirsan qoyska. Tani waa mid loogu talagalay in aad la isticmaasho daryeelahaaga, CDWA-na uma baahna nuqul ka mid ah.

Fadlan ogow in haddii aad doorato hay'ad daryeel guri ee daryeelka guriga gudahiisa, waxaa ay kuu abuuri doonnaan qorshe daryeel.

1. Macluumaadka Ka-faa'iideystaha
Magaca (koowaad iyo kan dambe)
Wakiilka sharciga ah (haddii uu ku habboon yahay)
Lambarka telefoonka (kuddar koodhka degaanka)
2. Macluumaadka Daryeelaha
Magaca (koowaad iyo kan dambe)
Cinwaanka
Lambarka telefoonka (kuddar koodhka degaanka)
3. Baahiyaha daryeelkayga

Waxaan u baahanahay in hawlahan la iga caawiyo (u noqo xaashida shaqada aqoonsadaha baahiyaha daryeelka ee ku taalla bogga 3aad si lagaaga caawiyo buuxinta qaybtan, haddii loo baahdo):

- ☐ Dhar-xirashada
- ☐ Qubeysasho
- ☐ Adeegsiga musqusha
- ☐ Dhaqdhaqaaq
- ☐ Cunid
- ☐ Maareynta daawooyinka
- ☐ U-kala-wareejin
- ☐ Dhaqdhaqaaqa sariirta
- ☐ Nadaafad shakhsiyeed
- ☐ Shaqo guri
- ☐ Cunto diyaarin
- ☐ Dukaameysi/Soo-adeegasho
- ☐ Ballamo
- ☐ Sahay alwaax/qoryaha la shito

4. Jadwal Shaqo

a. Waxaan u baahanahay _____ saacadood oo daryeel shakhsiyeed ah ☐ toddobaad kasta ama ☐ bil kasta.
* Dhammaan saacadaha waxaa loogu rogi doonnaa unugyo 15-daqiiqo ah gudaha nidaamyada lacag-bixinta WA Cares.

b. Waxaan u baahanahay daryeelaheyga in uu i taageero maalinta(maalmaha) iyo waqtiga(waqtiyada) soo socda:

Axad	Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti
☐ Waqtiga:	☐ Waqtiga:	☐ Waqtiga:	☐ Waqtiga:	☐ Waqtiga:	☐ Waqtiga:	☐ Waqtiga:

c. Adeegyada waxaa ay bilaaban doonaan xilli ku beegan ama ka-dib taariikhdan (ma noqon karto ka hor taariikhda bilowga oggolaanshaha hore):
_____.

Xaqiijinta iyo Saxiixyada

Marka aan hoos saxiixo, waxaan fahamsanahay oo aan xaqiijinayaa in:

- Hawlaha daryeelka, saacadaha iyo jadwallada ay ku waajibaan isbeddel ku saleysan baahiyada ka-faa'iideystaha, iyo awoodda iyo helitaanka daryeelaha.
- Daryeelaha wuxuu qaban karaa hawlaha daryeelka ee la aqoonsadey wuxuunna oggol yahay jadwalka iyo saacadaha.
- Daryeelaha wuxuu kaliya soo gudbin doonnaa warbixinnada xaashida waqtiga ee loogu talagalay saacadaha la oggolaaday lana fuliyay, iyadoo la fahamsan yahay in sheegashada ka badan oggolaanshaha hore ayaa laga yaabaa in aan la magdhowin waxayna si xun u saameyn kartaa isku-dheellitirnaanta dheefta ka-faa'iideystaha.
- Ka-faa’iideystuhu wuxuu ceyrin karaa daryeelaha waqti kasta iyo sabab kastaba ha noqotaa.
- Daryeelaha waa in uu ogeysiis bixiyaa ka hor inta uusan bixin, isaga oo u hoggaansan siyaasadda CDWA.

Saxiixa ka-faa'iideystaha (ama wakiilka sharciga ah)	Taariikhda
Saxiix daryeelaha (bixiyaha shakhsiga ah)	Taariikhda

Xaashida-Shaqada Aqoonsadaha Baahiyaha Daryeelka	
Waxaad dokumentigan u adeegsan kartaa aqoonsiga hawlaha daryeelka ee aad u baahan tahay in lagaa caawiyo, nooca caawimaadda ee aad u baahan tahay, iyo inta saacadood oo caawimaad ah ee aad filayso. Hawlaha daryeelka waxaa ka mid ah hawlaha nolol maalmeedka iyo hawlaha maalinlaha ah ee kaabaya nolol-maalmeedka. **Hawlaha nolol maalmeedka, ama ADLs**, waxaa loola jeedaa hawlaha is-daryeelka aasaasiga ah ee uu shakhsigu u fuliyo si maalinle ama joogto ah si ay u joogteeyaan daryeelkooda shakhsiyeed iyo wanaagga guud. **Hawlaha maalinlaha ah ee kaabaya nolol-maalmeedka, ama lADLs**, waxaa loola jeedaa hawlaha aasaasiga ah ee loogu talagalay nolosha madax-bannaana iyo maareynta guriga iyo nolosha qofka. Hoos waxaa ku xusan sharraxaadaha hawlaha iyo noocyada caawimaadda daryeelka uu kaa caawin karo.	
Noocyada caawimaadda	**Sharaxaadda**
Heegan ama korjoogteyn / kormeer	Daryeelaha wuxuu ku sugnaan karaa meel ay gacantu gaari karto, ama meel ay indhahaagu arki karaan
Tilmaamid hadal ah	Dhiirrigelin ama xusuusin lagu sameeyo hawl (sida cun cuntada, qaado daawooyinka, ama qubayso), ama xusuusinada sida hawl loo qabto (marka hore waxan samee, ka dibna waxaas samee)
Caawimaad jireed	Caawimo toos ah oo gacanta lagu qabanayo si hawsha loo dhammeeyo (sida in lagaa caawiyo ka kicidda sariirta, xirashada sharabaadyadaada, ama mayridda timahaaga)
Hawlaha Nolol Maalmeedka	**Sharaxaadda**
Dhar-xirasho	Hel caawimaadda gaarista iyo xulashada dharka, xiridda galuusyada/badhamada, xirista siibayaasha (zip), iyo xirashada ama iska bixinta dharka/sharabaadyada/ kabaha
Qubeys	Hel caawimaadda gelidda iyo/ama ka bixidda qubeyska, dhaqidda jirka, dhaqidda timaha, biyo is-raacinta, caawimaadda heeganka, qubeyska sariirta
Dhaqdhaqaaqa	Hel caawimaadda ku soo socoshada gurigaaga, riixidda, ama hagidda kursigaaga naafada ama socod-caawiyaha, baneynta/xanib ka qaadista waddooyinka lagu socdo, iyo la-socoshada bedqabka
U-kala-wareejin	Hel caawimaadda ka soo kicidda kursiga, fadhiisashada kursiga dheer, ku fadhiisashada/ka kicidda kursiga naafada, fuulidda/ka soo degidda sariirta
Wax Cunista	Hel qof cuntida kuu keena, cuntada kuugu jarjara ama kuugu burburiya hadba sida aad u baahato, kuugu baaqa in aad cuntada cantuujiso, ku quudiya, cabbitaannada kor kuugu haya
Dhaqdhaqaaqa sariirta	Hel caawimaadda in aad dhanka kale u gedisato ama in aad sariirta ku soo fadhiisato, in si joogto ah boos-beddel laguugu sameeyo si aad uga hortagto dhaawaca maqaarka
Nadaafadda Shakhsiyeed	Hel caawimaadda cadeysiga ilkahaaga, nadiifinta ilkahaaga macmalka ah, xiirashada, shanleynta timahaaga, marsashada kareem, jarista cidiyaha
Adeegsiga musqusha	Caawimaadda gelidda/ka bixidda musqusha, isticmaalka kursiga musqusha ama kaadida, tirtiridda, hagaajinta dharka, korjoogteynta, ama baaqa
Hawlaha Maalinlaha ah ee Kaabaya Nolol-maalmeedka	**Sharaxaadda**
Shaqo-guri	Hel caawimaadda dhaqidda weelasha, nadiifinta miisaska jikada ka-dib cunto diyaarinta, dhaqidda dharka, goglidda sariirtaada, nadiifinta sagxadaha, tirtiridda boorka, iyo hagaajinta/nadaafadda guud

Cunto diyaarin	Hel caawimaadda karinta cunto u diyaarsan in la cuno ama goor dambe la kululeysto, diyaarinta cunto fudud, qorsheynta liiska dalabka (hubso in aad ku wargeliso xasaasiyadaha, dookhyada ama xaddidaadaha cuntada)
Dukaameysi/Soo-adeegasho *	In lagu geeyo dukaan oo lagaa caawiyo adeegga, guriga ayay ku keeni karaan oo ayna kaa qaadi karaan, dukaanka ayay kaaga soo adeegi karaan, waxaa ay kuu soo qaadi karaan dalab barta internet-ka ah, oo ay ka mid tahay in ay daawooyinka kuu soo qaadaan
Ballamaha*	Hel gaadiidka loo raaco ballamaha caafimaadka, ballamaha caafimaadka ilkaha, ballamana caafimaadka dhimirka kooxaha taageerada ee midkood gaadiidka daryeelaha ama ay la socdaan hababka kale ee gaadiidka sida baska magaalada
Sahay alwaax	Hel caawimaadda isdulsaarka/rasteynta qoryaha ee guriga, gelinta qoryaha foornada (goobta dabka), iyo hurinta dabka. Kuma jirto jarjaridda qoryaha.
Maareynta daawooyinka	Xusuusinnada qaadashada daawooyinka, dib-u-dalbidda daawooyinka, diyaarinta sanduuqa kiniiniyada ama qalabka bixinta daawooyinka (IP-yadu ma geli karaan kiniiniyo afkaaga mana ku siin karaan adigoon ogeyn, sida ku qarinta cuntooyinka; sidoo kale, daawooyinka qaarkood waa in uu kormeeraa qofka ay u xilsaareen kalkaaliyayaal caafimaad oo diiwaangashan, haddii IP-gu uusan adiga qaraabo kula ahayn)

* Hawlaha gaadiidka la xiriira, daryeelaha wuxuu heli doonnaa tirada ugu badan ee maylasha lacagahooda loo celin karo. Haddii loo baahdo, isticmaal adeegga Gaadiidka Sanduuqa Wa Cares Fund si aad u hesho taageero dheeraad ah.

Isticmaalka macluumaadka kor ku xusan, xaashidan shaqada ee soo socota ayaa kaa caawin karta qorsheynta daryeelkaaga ee daryeelaha(-yaasha). Macluumaadka waxaa ka-dib loo adeegsan karaa dhammeystiridda heshiiska daryeelka ee kor ku xusan.

Hawsha	Miyaan u baahanahay in arrintan la iga caawiyo?	Soo noqnoqoshada caawimaadda loo baahan yahay?	Waxa aan u baahanahay in la iga caawiyo
MUUNAD - Qubeysasho	☒ Haa ☐ Maya	**3x toddobaad kasta**	**Gelidda iyo ka soo bixidda iyo dhaqidda timaheyga**
Dhar-xirasho	☐ Haa ☐ Maya		
Qubeys	☐ Haa ☐ Maya		
Dhaqdhaqaaqa	☐ Haa ☐ Maya		
U-kala-wareejin	☐ Haa ☐ Maya		
Wax Cunista	☐ Haa ☐ Maya		
Maareynta daawooyinka	☐ Haa ☐ Maya		
Dhaqdhaqaaqa sariirta	☐ Haa ☐ Maya		
Nadaafadda shakhsiyeed	☐ Haa ☐ Maya		
Adeegsiga musqusha	☐ Haa ☐ Maya		
Shaqo-guri	☐ Haa ☐ Maya		
Cunto diyaarin	☐ Haa ☐ Maya		
Dukaameysi/Soo-adeegasho	☐ Haa ☐ Maya		
Ballamaha	☐ Haa ☐ Maya		
Sahay alwaax/qoryaha la shito	☐ Haa ☐ Maya		